



Somali Senate

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

UJEEDDO: BAAHIN SHAQO:

AGAASIMAHAD WAAXDA SHARCIYADA IYO KAYDKA

TIXRAAC SHAQO LAMBAR : 003

CODSIGA SHAQADA WAXA UU FURAN YAHAY:

18 April – 24 April 2017

EMAIL: senatesom@gmail.com

Waajibaadka Agaasimaha Waaxda:

- Hoggaminta waaxda Sharciyada iyo keydka golaha iyo hubsashada suura-galinta adeeg tayo leh oo ka jawaabaya baahida dhaw iyo tan fog ee golaha
- Diyaarinta iyo isku dubba-ridka xilka iyo mas,uuliyadda waaxda
- Maaratinta shaqaalaha waaxda Sharciyada si waafaqsan maamuuska, hoodada, tayada, kartida ee mid walba leeyahay
- Hubsashada iyo daba-galka qabsoomidda iyo hir-galinta hawlahaa waaxda.
- Xoojinta xiriirkha wada-shaqeynta goluhu la leeyahay hayadaha kale ee Dowladda iyo kuwa caalamliga ah.

Address

KM-0 Shibus Dist, Banaadir
Mogadishu-Somalia

Contacts

Email: info@senate.gov.so - senatesom@gmail.com
www.senate.gov.so





Somali Senate

- Hawl-galinta tababka wada-shaqayn iyo iskaashi hufan oo dhex-mara waaxda iyo waaxyaha kale ee golaha.
- Qorista warbaxinnada looga baahdo waaxda iyo dukumintiyeynta hawlkaza oo ay waaxu daqabato.
- Hubsashada kahelista waaxda/guddiga takhasusaadka kaladuwan ee ay tabanayso shaqada dibu eegista sharciyada.
- Abuurista maktabad casri ah (Digital) oo lagu keydiyo dhamman sharciyada goluuhu meel mariyo iyo buugaagta maraajicda sharciga ah ee dunida.
 - Abuurista iyo horumarinta qorshayaasha wacyi-galin ee bulshada lagu barayo sharciga uu goluuhu meel mariyo.
 - Diyaarinta warbixin xilliyeed, sanadeed, kusaabsan gudashada shaqo, guulaha, horumarinta iyo caqabadaha.
- Samaynta cilmi baaris ku qotonta xaalka shariga dalka iyo istiraatijiyada lagu horumarinayo sharciyada.
- Bidhaaminta wadiiqooyinkii loo marilahaa in dadka loo diyaariyo barista iyo kawarqabka sharciyada cusub intaanan la go'aamin kahor, iyada oo laga furayo doodo warbaahinta qaybaheeda kala duwan.
- La socoshada cilmi-baarisyada la xiriira sharciga iyo qaunuunka ee ay sameeyaan hay'adaha kale ee dalka iyo ardayda jaamacadaha dalka iyo kafaa'idsigooda.
- Samayn daraasado la xiriira sidii dadka looga raaridilahaa awoodda sharciga iyo qaunuunka.
- Uruurinta iyo keydinta sharciyadii hore iyo kuwa cusub ee golaha meel mariyo.
- Tarjumidda sharciyada ku qoran afafka qalaad.
- Diyaarinta iyo helista khubaro aqoon u leh sharciga iyo tarjumaadda afafka asalka ah ee ay kuqoranyahiin shuruucda.
- Daabacaadda Sharciyada cusub iyo suura-galinta in laga helo goobaha loogabaahanyahay oo idil.

Address

KM-0 Shibus Dist, Banaadir
Mogadishu-Somalia

Contacts

Email: info@senate.gov.so - senatesom@gmail.com
www.senate.gov.so





Somali Senate

Shuruudaha looga baahan yahay

- Inuu Soomaali yahay, dhimirkiisu dhan yahay, aan danbe maxkamad xukuntey galin isla markaana da'diisa ka yareyn 25 sano
- Heerka aqoonta: *Master degree in law, political science or public administration*
- Heerka khibradda shaqo:
 - Ugu yaraan saddex sano (3 years) oo kihibrad ah ama wax u dhigma haddii uu haysto Master degree.
 - Ugu yaraan shan sano (5 years) haddii uu haysto shahaadada jaamacadda darjajada 1aad Bach. (*law, political science or public administration*)
 - ee 1aayeraan shahaada 2aad ee jaamacada (master degree) oo la xiriirta Sharciga ama wax dhigma.
- Inuu lee yahay ugu yeraan 3 sano oo khibrad shaqo ah oo la xiriirta howlaha Sharciga ama wax u dhigma.
- Inuu ku hadli karo islamarkaana qori karo ugu yeraan luuqadaha Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiirska
- Inuu lee yahay aqoon uu si fiican ugu adeegsan karo aaladda Komputerka.

Sida Loo soo codsanayo

Dadka daneynaya waxay ku soo codsan karaan qaab online ah oo keliya. Waxaa lala soo xiriiraya oo keliya dadka ku soo baxa liiska gaaban. Fadlan ku soo dir codsigaaga, Taariikh nololeedkaaga iyo nuql shahaadooyinkaaga ka mid ah emailkan: senatesom@gmail.com. Fadlan cinwaanka codsigaaga ka dhig jagada aad soo codsanayso iyo numberka tixraaceeda. Gabdhaha leh takhasuska iyo khibrada loo baahan yahay waxaa lagu boorinayaa inay soo codsadaan.

Ugu danbeyn codsigaaga soo dir 24 April 2017 4:00pm.

Address

KM-0 Shibus Dist, Banaadir
Mogadishu-Somalia

Contacts

Email: info@senate.gov.so - senatesom@gmail.com
www.senate.gov.so

